

Utbildningsförvaltningen  
**Information om covid-19**

## **Covid-19 dugsiyada sare kadib 9 – febraayo.**

**9 -febraayo -2022 waxaa la saari doonaa inta badan xannibaadaha covid-19. Dancan wali waxaa aad u sareeyaa faafida cudurka ee bulshda dhexdeeda ah, dhamaanteena waxaa na saaran masuuliyad weyn oo ah in aanan gudbin cudurka.**

**Taas macnaheedu waa adiga oo ah arday dhigata dugsiga sare in:**

- Waa in aad joogtaa gurigaaga kana fogaataa u dhawaanshaha dadka kale haddii aad hesho xauun leh astaamo cudur oo laga yaabo inay yihiin covid-19, sida qufac, qandho, dhuun xanuun, madax iyo jir xanuun.
- Wuxaan dugsiga ku soo laaban kartaa markaad ka caafimaado xanuunka.
- Waa la joojiyay karantiilka qoyska mana u baahnid inaad joogto guriga haddii qof qoyska kamid ah uu xanuunsado..
- Waa la joojiyay iskabaaritaanka covid-19, waxaa kaliya oo isbaaristu quseysaa dadka ka shaqeeya daryeelka caafimaadka iyo daryeelka dadka waaweyn. Umana baahnid inaad iska baarto jirro iyo astaamo cudur.
- Uma baahnid inaad dugsiga ogeysiiso hadduu kugu dhaco covid-19.
- Uma baahnid inaad xirato iallaliyaha afka gadiidka dadweynaha dhexdiisa.
- Marka la eego halista qaadista cudurka waxaan kugula talineynaa inaad sii wado inaad dhaqdo gacmahaaha markasta oo aad isticmaasho alkolka.
- Wuxaan kugula talineynaa inaad istalaasho.
- Dadka aan la tallaalin waa inay taxaddar badan sameeyaan oo ay iska ilaaliyaan ciriiriga iyo hoolalka dadka badan lagu kulmiyo.

### **Dugsi kasta maamulihiisa ayaa go'aan ka gaaraya**

Maaddaama faafitaanka caabuqa uu weli sarreeyo, waxaa laga yaabaa inay sii socoto habeynta dugsiyada iyo xarumaha firaaqada ah qaarkood. Tusaale ahaan, waxbarashada fogaanta waxaa la bilaabi karaa haddii ay jирто maqnaanshaha in badan oo ka mid ah shaqaalaha. Dugsi kastaa wuxuu ku soo noqonayaa si caadi ah iyadoo loo eegayo xaaladihiisa.

### **Koorsooyinka afka hooyo iyo luqadaha casriga ah ee fiidki ee katerdalsskolan**

Ilaa fasaxa ciyaaraha waxaad sii wadaneysaa waxbarashada fogaanta ee afka hooyo. Xataa Koorasoooyinka fiidkii ee luqadaha casriga ah ee Katedralskolan waxay ahaan doonaa masaafo fog ilaa fasaxa isboortiga. Isniinta 28ka Febraayo ayaa labadaan koorso ku soo laaban doonaan waxbaridda goobta, markaa waxaad dib u aadi doontaa dugsiga koorasyadan.

### **Macluumaad dheeraad ah**

Waxaad ka heli kartaa boggogaan, warbixin cusub oo ku saabsan covid-19

- [Region Uppsalas webbplats 1177](#)
- [Folkhälsomyndigheten](#)

Salaan Christine Kastner Johnson, Maamulaha Dugsiga Sare